

HAGAHA WAALIDKA EE CMAS: Qiyaasaha Guusha Aqoonta Colorado



Qiimaynaha waxay bixiyaan macluumaad qiimo ugu leh ardayda, waalidiinta iyo barayaasha haddii ardayda gaareen heerka fasalkaiyo heerarka nuxurka oo ay ku joogaan jidkii ay ku qalinjabin lahaayeen iyaga oo diyaar u ah qarniga 21ad. Natiijooyinka qiimaynta waxay bixisaa hal qiyaas ee xajmiga caddaynta ee horumarka aqoonta ilmahaaga.



WAA MAXAY CMAS?

Qiyaasaha Guusha Aqoonta Colorado, ama CMAS, waa qiimaynta gobolka Colorado ee farshaxanimada luqadda, xisaabta, sayniska iyo aqoonta bulshanimada. CMAS waa *qiimayn* kooban oo bixisa macluumaad sida uu ilmuhu ugu fiican yahay barashada hababka muhiimka ah iyo xirfadaha heerka fasalkiisa.

Lab aka mida qiimaynaha – Farshaxanimada Luqadda Ingiriisida iyo Xisaabta – waxa abuuray PARCC, *Wadaagta Qiimaynta Udiyaargarowha Kulliya iyo Mihnado*, oo lagu sargooyey Heerarka Nuxurka Guud ee Gobolka ee farshaxanimada luqadda (oo ay ku jirto akhriska, qorista iyo xiriirtanka) iyo xisaabta. Qiimaynaha kale – Farshaxanimada Luqadda Isbaanisha Colorado (SLA), Sayniska iyo Aqoonta Bulshanimada – waxa abuurta Colorado. Imtixaanada Sayniska iyo Aqoonta Bulshanimada waxa lagu sargooyey Heerarka Aqoonta Colorado, imtixaanada Farshaxanimada Luqadda sbaanishka waxa lagu sargooyey heerarka Nuxurka Guud ee Farshanimada Luqadda Isbaaishaka.

Imtixaanada CMAS ee Farshaxanimada Luqadda Ingiriisida waxa la siiyaa sannad kasta dhammaan 3rd--9th ardayda fasaladaas. Sayniska CMAS waxa la siiyaa sannad kasta 5th and 8th ardayda fasalada, iyo Aqoonta Bulshanimada oo la siiyo sannad kasta 1/3 ee dhammaan 4th iyo 7th ardayda fasaladaas. SLA waxa la siiya Bartayaasha Kuhadalka Luqadda Isbaanishka ee kujira 3rd iyo 4th fasalada ee kujiray dugsiga gudaha Maraykanka 5 sanno ama kayar.



GOORMA AYAA ILMAHAYA LA INTIXAAMAYAA?

Qiimaynaha CMAS waxa lhu maamulaa hal dariishad imtixaanis. Xilliga dayrta (spring) 2016, dugsiiyada waxay bilaabi karaa imtixaanista ilaa Maarso 14th oo dhammaada Abril 29^{ka}. Ilmahaaga waxa keliya la imtixaami doonaa maalmaha qaar ku salaysan fasalka iyo maadada, aan ahayn dhammaan dariishadda oo dhan. Kala tasho dugsiga ilmahaaga jadwalka gaarka ee imtixaanistiisa.

Inta badan, ardayda waxay imtixaanka ku qaataan onlayn. Imtixanaada onlaynka ah waxay leyihiin su'aalo kala duwan oo iskudhafan oo kordhiya kuhawlanaanta ardayga ee noocyada walxaha sida metalaadda sayniska iyo walxaha jawaabaha tiknoolajiyada laxiriira. SLA waa imtixaan kusalaysan waraaq, ardayda ka qaybqaadata SLA ma qaataan CMAS. Farshaxanimada Luqadda Ingiriisida PARCC.

Si la mida sannado tegay, Waaxda Waxbarashada Colorado waxay ku qiyaastay waqtiga caadiga ah ee imtixaanista ardayga inuu ka yaraan doono 1.5% ee isugaynta sannadlaha ee waqtigii waxbaristooda. Iyada oo gaar ah CMAS, ardaydu waxay ku qaadan doonaan 8-14 saacadood qaadashada imtixaanada CMAS ee sannadkan. Qaddarka waqtiga saxda ah waxay qeexa fasalka iyo maadada.



WAA MAXAY DHIBCO(AHA) UU ILMAHAYGU HELI DOONAA?

Ilmahaagu wuxu heli doonaa Warbixinta Waxqabadka Ardayga iyo qiyaasta guud iyo heer waxqabad guud si loo muujiyo waxqabadka guud ee ilmahaaga ee qiimaynta jiidda nuxurka lagu imtixaamay. Dhibcaha ka hooseeya heerka waa lagu dari doonaa si loo uujiyo sida uu ilmahaagu ugu fiicnaa heer kasta.

Iskucelcelinta dugsiga, degmada iyo gobolka waxa lagu dari doonaa warbixinta si aad isku barbardhigto waxqabadka ilmahaaga iyo waxqabadyada kuwa kale.



SIDEE AYAA DHIBCAHAAS LOO ISTICMAALAYAA?

Natiijooyinka CMAS waxay bixiyaan sawirka hawsha ardayga ee dugsiyada, degmooyinka, macalimiinta iyo bulshada. Natiijooyinka waxay muujiyaan sida ardaydu ugu hormarayaan aqoon ahaaneed, taas oo ah qayb muhiim ah oo lagu hubinayo in ardaydu ku joogaan inay qalinjabiyaan iyaga oo diyaar u ah kulliyad iyo mihnad. Macalimiinta ayaa u isticmaala natiijooyinka CMAS horudhigidda waxbarista si looi gaaro baahiyaha qofka ardayga ah. Dugsiyada iyo degmooyinka ayaa u isticmaala natiijooyinka CMAS si ay ugu sameeyaan toosin barnaamijyada waxbarista ee sannadka soo socda.



MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ku hawlanaato waxbarashada ilmahaaga. Fadlan ha ka waaban inaad kala xiriirto macallinka ilmahaaga siyaabaha aad guriga ugu caawin karto ilmahaaga.

Waxa kale oo aan kugu dhiirigelinaynaa inaad tagto <http://standards.dpsk12.org/standards-resources/> si aad u hesho macluumaad, ay ku jiraan:

- Hagayaasha Waalidka DPS ee Barashada Ardayga
- Hagaha Waalidka ee Tiknoolajiyada
- Macluumaadka Bartayaasha Ingiriisida

Qaado imtixaan ku-tababaris ah!

- Farshaxanimada Luqadda Ingiriisida iyo Xisabta: www.parcc.pearson.com → click the *Test Preparation* tab → select *Imtixaanada Ku-tababarista*.
- Farshaxanimada Luqadda Isbaanishka <http://www.cde.state.co.us/assessment/csla> → riix heerka fasalka ku-tababarista imtixaanka aad rabto inaad aragto.
- Sayniska & Aqoonta Bulshanimada www.pearsonaccess.com → riix *ePAT* tab → xulo fasalka/nuxurka aad rabto inaad aragto, dabeedna riix midka leh cinwaanka *14-15 TN8 SS/Sayniska ePAT*.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee qiimaynta iyo fudaydinta imtixaanada, fadlan booqo bogga websitka ee Laxisaabtanka, Cilmibaarista, iyo Qiimaynta. www.dpsare.com

Haddii aad ka qabto wax su'aalo ama welwawl ah oo la xiriira qiimaynta, fadlan toos ugala xiriir dugsiga ilmahaaga am aka wac khadka taageerada Ku-hawlaanaata Qoyska & Bulshada (720) 423-3054.